# Tababar waalidiinta ee ka caawinta ilmaha xisaabta shaqo guri

**Xogta iyo meelaha laga heli karo si aad uga caawisid ilmahaaga xisaabta shaqo guri (Somali version)**

| Filashada guud ee Macalimiinta xisaabta shaqo guri* | | | |
|---|---|---|---|
| **Fasalka** | **Waqtiga loogu talo galay maalin walba in xisaabta laga shaqeeyo** | **Cadadka shaqo guri** | **Maalmaha la iska rabo** |
| K | 10 daqiiqo | Asbuuckasta hal xirmo | Isniinaha (1 fasalkasta Jimcooyinka) |
| 1 | 10-15 daqiiqo | Asbuuckasta shaqo guri joogto ah fasalkasta. | Jimcooyinka |
| 2 | 10 daqiiqo | Asbuuckasta hal xirmo | Jimcooyinka |
| 3 | 15-30 daqiiqo | 2 jeer fasal ku shaqeyn maalinkasta ah, 2 jeer fasaladu leeyihiin xirmo toddobaadle ah | Maalinle (Xirmada Jimcooyinka) |
| 4 | 20-30 daqiiqo (40-60 daqiiqo halkii fasal) | Layli maalinle ah oy ku jiraan maalmaha nasashadu. | Maalinle |
| 5 | 30 daqiiqo | Layli maalinle ah iyo layli maalmaha nasashada qaarkood. | Maalinle |

*Fadlan, ogow macalimiintu way kala duwan yihiin, casharro kala duwan ayey bixiyaan. Fadlan marwalba si toos ah ula xiriir macalinka ilmahaaga. sidoo kale, Layligaan wuxuu fikrad ka siinayaa xisaabta shaqo guri. Macalimiintu waxay kaloo u baahan yihiin in aqalka wax lagu akhriyo. Akhriska waa in lagu daraa daqiiqadaha kor ku xusan.

**Shaqo guri waa shaqo madaxbannaan**. waxaa loola jeedaa in ilmahaagu uu awoodi karo in uu layliga guriga uu keligii sameyn karo isagoo aan caawimaad badan helin. Shaqo guri waa **naqtiin xirfadaha** uu ilmahaagu horey ugu soo bartay fasalka.

## computer bilaash ah, waxaad ka baranka bogga internet-ka:

- Baratikada xisaabta guud iyo sharraxaadaha www.ixl.com/signin/vae
- Casharro xisaab Muuqaal: www.khanacademy.org
- Baratikada xisaab dhab ah www.xtramath.org
- Qaamuuska xisaabta : http://amathsdictionaryforkids.com/dictionary.html
- Banrnaamijyada xisaabta iyo al-caabta www.kidsnumbers.com
- Sharraxaad xisaab, baratikada iyo al-caabta: www.mathsisfun.com
- Al-caab xisaabeed: www.sheppardsoftware.com/math.htm
- qalabka xisaabta asaasiga u ah iyo meelaha laga heli karo: http://nlvm.usu.edu
- Heesaha muhiimka ah ee xisaabta iyo waxqabadka www.starfall.com (kadib riix “Xisaab”)

## waxyaabaha kale ee la heli karo:

- Flash-cards-ka (waa laga gadan karaa ama waxaad ka sameysan kartaa jeldiga adag ee sanduuqyada boorashku ka dhammaadey)
- 100 Jadwalka xisaabta ay ku qoran tahay
- lambarada xisaabta
- Xisaab ciyaareed (macalinka wax ka weydii)
- Jadwalka Isku-dhifashada
- Jadwalka isugeynta (iskudarka)
- waxyaabaha aqalka laga helo sida (qadaadiicda, Saacadda, waxyaabaha yar yare wax lagu xisaabiyo, iwm)

## Su'aalo aad ka weydiin kartid ilmahaaga layliga guriga

- Sidee jawaabta ku heshay?
- Waa maxay tallaabooyinka aad u baahan tahay in aad sameysid?
- Waa maxay tallaabada labaad?
- Ma jirtaa dariiqo kale oo aad mas'alada ku xallin kartid?
- Mas'alada sawir ahaan ma ku muujin kartaa?
- Hoos ma ka xarriiqi kartaa qaybaha muhiimka ah ee mas'alada?

| Samey | Ha sameyn |
|---|---|
| • U deji waqti gaar ah layliga guriga maalinkasta.<br>• Hel meel xasilloon oo aad layliga auriga ku sameyn kartaa oo aan buuq badneyn.<br>• Ka dami TV-ga iyo Musikada qolka ilmuhu ku shaqeynayaan.<br>• Eeg buuggga xisaabta ilmahaaga ama tusaalayaasha sida ay u xalliyeen mas'alooyinka.<br>• Warso ilmahaaga in ay kuu sharrraxaan fikradahooda.<br>• Baratiko ku Samay iskudarka, kalajarka, iskudhifashada, iyo isuqaybinta dhabta ah ee maalin walba.<br>• Isticmaal waxyaabaha laga heli karo bogga internetka ama auriga ama Maktabadda.<br>• Isticmaal waxyaabaha laga heli karo aqalka dhexdiisa oo ku saabsan xisaabta. sida :Saacadda, qadaadiicda, waxyaabaha la tiriyo, iwm. ayaa ah waxyaabaha maalin walba xisaabta ku xira nolol maalmeedka.<br>• U sheeg macalinka haddii aanu fahmin ilmahaagu. Waad wici kartaa, email u diri kartaa ama qoraal u qor.<br>• Weydii macalinka haddii la heli karo waxbarid dheeraad ah hadii ilmahaagu u baahan yahay.<br>• Macalin ka doon derisgaaga. | • Ilmahaaga shaqada guriga ha u qaban. macnaheedu waa jawaabta ha u sheegin ama ha u qorin.<br>• Ilmaha ha ku dhihin isticmaal makiinadda xisaabta si uu mas'alada u xalliyo (ilaa ay macalinku sidaa ku yiraahdo mooyee).<br>• Ilmahaaga ha u sheegin mas'alo xisaabeedka.<br>• Ha ku xanaaqin ilmahaaga hadii uu jawaabta caldo.<br>• Ha ka yeelin ilmahaaga in ay tirada xisaabta keliya ka shaqeeyaan waa in ay sheeko xisaabeedka masawir ku muujiyaan ayna sharrxaan sida ay jawaabta ku Helen, xattaa hadii ay khalad tahay.<br>• Ilmaha in ay caawadii oo dhan shaqada la daalaadhacaan ha ka yeelin. fadlan macalinka la socodsii. |

## Community Tutoring Resources

- Atlantic Street Center (206) 329-2050
  - New Holly Youth & Family Center (206) 723-4073
  - Rainier Beach Family Center (206) 723-1301
- Catholic Community Services/Youth Tutoring Program
  - New Holly (206) 725-7942
  - Rainier Vista (206) 436-1908
- El Centro de la Raza (206) 957-4634
- Filipino Community of Seattle (206) 722-9372
- Horn of Africa Services
  - Rainier (206) 760-0550
  - Rainier Vista (206) 723-2062
  - New Holly (206) 462-1378
- Salaam Urban Village Association (206) 708-6382
- Somali Youth & Family Club (206) 772-0892
- Union Gospel Mission Youth Reach Out Center (206) 725-2432